

Ku dabaashada webiyada naftay halis u tahay!

Biyaha HA GALIN, xeebta jog.

Sawab?

Siddexda **S** o qatarta ah dartiis:

Mawjadaha (**Strömungen**)

Muujadaha (**Strudel**)

Maraakiibta (**Schiffe**)

Mawjadaha wuxu kaaga fogaynaya xeebta, muujadaha ayaa hoos ku soo jiidaya iyo hirarka maraakiibta maraayo waxay kuu soo jiidi karaan sida bir labta.

Waa kulushahay bannaanka iyo waxaad doonaysaa inaad gasho biyaha qabow?

Markas waxad adi kartin barkadaha dabaasha iyo harooyinka qubeyska o degmada Groß-Gerau ku taalo.

Fiidiyowga laga soo qaaday ZDF logo ayaa si fiican u sharraaxay:

<https://www.zdf.de/kinder/logo/erklaerstueck-baden-in-fluessen-100.html>

Marka ay aad u kulul tahay dibadda, dadku waxay jecel yihiin inay waqtii ku qaataan Rhein am Main.

Laakiin **ISKA JIR**: Ha iloobin in **ku maydhashada webiga**, xitaa dadka dabaasha khibradda leh ama ku adeegga samatabbixinta biyaha ama xitaa kuwa ka socda Ururka Badbaadinta Nolosha Jarmalka (DLRG) ay **arin aad u qatar** u noqan karta. Wabiyada waaweyn, sida Rhein iyo Main, waxaa jira dhowr khataro.

Mawjadaha:

Mawjadaha a soo jiidaysa dabaashaha oo ka kaxaysa xeebta si xoog iyo xawli badan leh. Ma heleysid fursad aad xita dib ugu so dabaasho, qof kale caawimaadis la'aanteed.

Mawjadaha aad buu u xoog badan yahay.

Muujadaha:

Muujadaha waa wax xun. Waxay ku dhuuntaan oogada biyaha hoostooda. Sidaa darteed ma arkaysid, adigo filineynin ay ku so baxayaan. Muujadaha ayaa qofka biyo hoostooda ku jiida.

Maraakiibta:

Rhein iyo Main waa wadooyin waaweyn oo loogu talagalay maraakiibta xamuulka qaada. Webiga ayay kor iyo hoos u maraan mar kasta. Waxay abuuraan hirarka xoog leh. Hirarka waxay u shaqeeyaan sidii bir labta: shay kasta iyo qof kasta waxay u jiidayaan markabka, waxayna shayga ama qofka markabka hoostiisa ku riixi karaan.

Sidee u dhaqmi kartaa markaad aragto in qofka biyaha ku jira uu halis ku jiro?

- Isla markiiba wac 112
- Meesha aad joogto sharax
(calamadaha webiga nambaro ku taalo - eeg tusaalaha hoos)



- Muhiimada waxa eh: waligaa biyaha ha gelin, waa qatar

Taasi micneheeda waa maxay? Webiga agtiisa: Bananka joog!

Biyaha ad laakin rabtaa in aad gasho? Markas **barkadda dabaasha** ama **harada qubeyska** taga. Mise sawirka hoose maku noqon kartaa fikrad laysku qaboojinayo maalinta xagaaga kulul?:



Hada si fiican ayaa laguu wargeliyay:

Noqo indho-indheeye oo u sheeg asxaabtaada, qoyskaaga iyo dadka aad taqaano, waxa aad hada baratay! Sidan ayaad nolol badan uu badbaadinkarta .